22 – GEEL IV

| | |
|---|---|
| Axmed Nuur | Maanta oo ay khamiis tahay Oktoobarna 19 (sagaal iyo toban) tahay waxa weeye odayaashu waxey ka doodi doonaan, geela, erayadii ka dhimmanaa ayaa halkan looga doodi doonnaa. Erayadaasuna waxaa weeye erayo kooban oo doqoni magarato ah aad mooddo iney ku saabsan yihiin, neefka oor-boodkiisa iyo siduu yeelo iyo siduu u qaato uu u uur qaato, xooluhu siday u uur qaadaan, markey dhalaayaan iyo waxaas ayeey ku saabsan yihiin.<br>Marka waxan weydiinayaa laba oday, waloow aan isku raacsannahay oo aan ku heshiiney ereyadaan haddana, laba oday ayaa fasiri doonna. Labadaa oday waxey yiraahdaan ayey annaguna inoo tahay, ee odayaashuna waxaan u weydi doona sida soo socota. Fiqi-Buraalow buur muxuu yahay? |
| Fiqi Buraale | Waad mahadsan tahay Axmed Nuur. Buur annigu waxaan u aqaan geelu markuu baar-qabka ku qooqmo, ee uu wada maro uu wada abaahiyo uu isku cel celiyo Awrkaasoo qaqaba in geelu mar wada goojiyo iyo markaasaa la yiraahdaa, geelu waa wada buursanyahay. |
| Axmed Nuur | Aw Daahirow buur maxaad ka oran lahayd? |
| Daahir Afqarshe | Buur sida uu Fiqi-Buraale u sheegay weeye oo waa marka dabadeed hasha ugu horreysa iyo hasha ugu dambeysaba uu abaahiyo uu isku celiyo yaa la oranayaa. Geelii wuu gaarta bixi waayayoo awrkaa ku noqnoqonayoo oo buuriyayoo doonay inuu mar wada goojiyo. |
| Axmed Nuur | Daahir Af-Qarshe waad ku mahadsantahay waxaan u noqonayaa ninka la yiraahdo, Fiqi Buraale. Fiqi buraalow Daba-qaad, ereygaa daba qaadka ah bal inoo micnee. |
| Fiqi Buraale | Daba qaadkaa waxaan u aqaanaa geela marka baar-qabka uu abaahiyo goojada weyn intuusan gaarin ee hasha dabada meeshii la rabay ay gaarsiinin baa la yiraahdaa – Baba-qaad. |
| Axmed Nuur | Daahir adiguna dabaqaad maxaad u taqaan? |
| Daahir Afqarshe | Isagaan ku raacsanahay oo waa sidaa. |
| Axmed Nuur | Waxaan ku noqonayaa Fiqi-Buraale, Fiqi Buraalow sheeg ereyga oo geelii waa jeemay, muxuu yahay ratigii waxbuu jeemay, eraygaa sheemka ah bal noo micnee. |
| Fiqi Buraale | Waxaan u aqaanaa baar qabka markuu qooqo ee geelo uu ku qooqo geelaasuna gooni uu u yahay, hadduu geelal kale arko ayuu wuxuu u diidaa iagoo hinaasa ah inay baarqabka geela ku jira ay geela soo dhex galin, markaas ayuu geeliisa gooni u cayrsadaa, markaasaa la yiraahdaa, baar qabka geela wuu sheemayaa. |
| Axmed Nuur | Daahirow ratigaas reer hebel ama baar qabkaas la yiraahdo magacaa sheem buu yaqaan ama geelisu waa sheenaa. Noo micnee adigoo |

raad raacaya ninka la yiraahdo Fiqi-Buraale.

Daahir Afqarshe: Mahadsanid sheemiddaan waxa weeye nooc bani'aadan kana hinaasaha loo yaqaano xayawaankuna marka uu qooqo kulligii waxaa isagu markaas isagu ku qooqan yahay waa ceshadaa, markaa dabadeed waxeynu ognahay Doofaarka iyo Eyga uun baa hinaaso aqoon oo dabadeed laga kaxeestaa.
Wax dheddig wuu ceshanayaa wuu ku hinaasayaa wax alla iyo wixii doonayo iney xoolaha kale uga taginoo qooqa, baarqabka markuu geeliisu ceshanayo uu doonayo inuu cidla la maro baa la yiraahdaa wuu sheemayaa.

Axmed Nuur: Waxaan u wareegayaa Salaad. Salaadow weli sheemmida ereyga la yiraahdo waxbaa iga dhiman, ee waxaan kaa rabaa ratigaas marka sheem buu yaqaanaa ee gurgurradiisu waa wax buu sheemayaa ma ahee marti buu sheemayaa ma ahee dad cun ma aha ayaa la yiraahdaa, marka sheemka ereyga la yiraahdo weeye.

Salaad: Mahadsanid Axmedoow. Annagu sheem sida nimankaas u sheegeen baan u naqaan ratiga geela hadduu geel kale u jeedo wolow xataa dad uusan arki jirin hadduu u jeedo wax dhan waa diidaa oo waa uu diidaa ratiga marmarkoo xitaa geela dhan la taagayoo la waaya sannad dhan la raadshaa uu la cararaa hadduu geelyoow kale uu arko uu ka dhacsadaa oo saasaan annagu sheemka u naqaan.

Axmed Nuur: Waxaan anna weli ku noqnoqonayaa ninka la yiraahdo Cali Mudiir. Cali Mudiirow bal adiguna ereyggaas sheemka la yiraahdo maxaad ku dari laahayd.

Cali Mudiir: Waxaan u aqaanaa. Wax tiir buu leeyaahayoo kaleete wax buu tiirayaa, wax buu sheemayaa yacni waxaa weeye, haddii uu soo galo een ariga ari qalaad haduu u soo galo amba xoolo qalaad ay soo galaan, ariga qalaad markuu u soo galo aa tiiraayaa diidaayaa weeye maya, kan qaloonayaa waxa weeye midka yimid weeye. Laakiin kan kaleeto nafsadiisa waxa cusub diidaya marka waa tiirayaa weeye aa diidayaa, macnaha waa sheemayaa waxa cusub ayuu diidadayaa weeye, waxaan waa wax qalaad raattiga marka uu diidayaa ratti kaleeto in oo soo galo meesha, waa sheemayaa, waa tiirayaa baa la yiraahdaa waa siidayaa.

Axmed Nuur: Ereyga sheemka la yiraahdo xoogaa waxaad moodaa inuu erayada kale ka adag yahay ee aynu hadda soo marnay, marka odayaashaan ku wareejinayaa.
Waxa weeye ratigaasu geeliisa awra kale wuu ka sheemaa, ratigaasu reerkiisa reerkiisa reerkiisa ama reerka leh dadka u yimaada wuu ka sheemaa, marka sheem buu yaqaan baa la yiraahdaa, haddana ereygaas erey kalaa ka sii farcamaa waxaa la yiraahdaa sheema oo mar mar baa waxa la yiraahdaa sheema oo geela waxaa la yiraahdaa sheema ayaa loo bixiyaa iyadane saas ayaa la yiraahdaa waxaan ku noqonayaa – ninka la yiraahdo Dhaga Weyne. Dhaga Weynow sheemida sheeg bal adigoo gaabinaya – warka.

| | |
|---|---|
| Dhegaweyne | Sheemidda taa weeye oo geela keliya ma laha lo'daa leh, intaa oo lo'dii intey sheemtay bey meel cidla ah ku hor joogsataa inay dibi kale iyo lo'yow u guda gasho dib iyadaa kala qabsanaya sheymaha hadba loo bixinayaa waa hal weyrax ahoo wixii soo dhawaadaba kula boodoo neefkeeda ka ceshaneyso sheemidu waa waxaa wixiis ceshanayo weeye. |
| Axmed Nuur | Ereyga sheema la yiraahdo weli ma buuxo sheema. Fiqi-Buraalow adigaan kugu celinayaa jinni ninkii keena baa bixiya, bal sheema geela goortuu yiraahdo oo ratiga laga tago maxey sheemidaa? |
| Fiqi Buraale | Sheema iyo sheemid waa kala laba nooc tii hore waa teynu soo marnoo awrku geeliisa waa sheemayaa waa teynu ku macneynay, mina wixii lab ahoo dhan waa sheemaan. Dhegigoodkooda waa teynu niri inkastoo geela uu ugu magac dheer yahay oo la yiraahdaa awrku waa sheemayaa. Laakiin kan dad iyo duunyo waa la leeyahay sheemidaan oo xitaa raggu maarka la leeyahay waa hinaasay – waa sheemiddii oo kale weeye buu yiri wixii riseerfa buu yiri.<br>Sheema waa magac geeloo dhan baa la yiraahdaa sheemay marka gabayada lagu tirinaayo, hal keligeedna waa loo bixiyaa sidii Dhegaweyne uu u yiri oo la yiraahdo sheema oo waa hashaas magaceed dabeecadeedaa loogu bixiyay.<br>Sheema geela guud ahaan marka loo gabyayona sheemay yaa loogu hal qabtaa oo shaki ma leh inuu reer hebel sheema weeraray sidii loo yiri u oran maayo laakiin guud ahaan baan ka soo qabtay, haah, shaki ma leh reer hebel inuu sheema weeraray markaa geelii oo dhan baa lagu jeedaa, reer hebel inuu geela weeraarey sheema la baxayba. Marka anigu saasaan u aqaan. |
| Axmed Nuur | Waxaan weydiisanayaa ninka la yiraahdo Daahir Af-Qarshe oo gabyaa weyn ah gaba qabat weyn ah sheema gabey kuu ahaa tiri gabaygaas wax kastaba ha ahaadee. |
| Daahir Afqarshe | Sida uu Fiqi-buraale u sheegay weeyaan oo:- Iyadoo shamaal quruxsan oo shaa; asli ah moodday, goortii shamsadu soo baxday oo waagu shararaayey shaki ma leh inuu reer hebel sheema weeraray. |
| Axmed Nuur | Shaki ma leh inuu reer hebel sheema weeraraye, haaye!<br>Shuuqa iska deey wiilal baa sheema dhaafsadaye.<br><br>Mid kalena saasuu yiri. Ereyga la yiraahdo adkeysi, marka adkeysigu geela wuu adkeystay ee Fiqi-Buraale adkeysi. |
| Fiqi Buraale | Adkeysi horta anigu waxaan u aqaanaa, horta dhedigoodku dad iyo duunyo waa kala qadug leeyihiin oo maxay kala yihiin abasaxaan yaa markiiba marka la taabto geela markiiba rimaa qaarna ilaa baarqabka ku noqnoqdo ma muuqato goojidooda markaasaa waxa la yiraahdaa waa qadh adagtahay waa qadh jilicsantahay marka sidaas ayaa anigu ugu aqaanaa qadh adkeysi taasaa u aqaan. |

Axmed Nuur — Waxaad adkeysi ku sii dartaa Daahir Afqarshow laba erey, ereygaa la yiraahda adkeysi iyo qar-nugeyl, laabadaa isku fasir oo midba sheeg sidey kala yihiin.

Daahir Afqarshe — Mahadsanid. Adkeysi anigu waxaan u aqaanaa hasha marka ay goojiso ee ay noqoto dabaqaad marka halkii ka sii kordhiso ee ay goojadii xoog yeelato, yaa la yiraahdaa intaas halaad waa adkeysoo goojadoodii wey dhameysteen oo lagu caddeeyay iney riman yihiin, intaas halaadna waa daba qaad, intaas halaadna weli ma gaasa bixin oo laba gaarin waa buug. Saasaan u kala aqaanaa oo dabadeed adkeysku waa hasha markii goojadii aad u adkeyso oo la ogaado iney riman tahay la cadeeyay.

Axmed Nuur — Weli waxaan u sii celinayaa ninka la yiraahdo Dhega-Weyne ayaan u gudbayaa Dhega Weynow adkeysi iyo qar-nugeyl bal ereyadaa kala gur, labada erey kala gur.

Dhegaweyne — Horta qar-nugeylkaan kaaga waramayaaye waa marka hasha awrku abaahiyo uusan mar labaad ku celinin ee markiiba rinta iyadoo halkaasi dhakuuda adkeysiguna hasha marka hore in yarey dabada qaaddaayoo oo mudadii baan gaarin hadhow markay madada gaadho madax iyo dabadiiba waa taageysaayoo labadiiba waa – adkeysaneysaa waa amaareysaa markaas waa adkeysataa la leeyahay.

Axmed Nuur — Cali Mudiir baa halkaa gacanta ka taagaya, Cali Mudiirow adiguna maxaad ku dari lahayd labadaa eray kala bixi bal, adkeysi iyo qar-nugeyl.

Cali Mudiir — Maya, anigu su’aal aan qabo baan soo celinayaa, waxa weeye saw xisaab kuma jirto marka la sheegayo illeyn ninkaan xayawaankiisu waa jiraaye uu la jiraan markuu u boodo wuu ogaa marka xisaabtu intaas oo habeen intaas oo bilood markii uu qabo bootintii uu qabo ayaa magayda loo kala baxshaa sow ma aha?

Axmed Nuur — Su’aashaas waxaan u gudbinayaa Daahir Af-qarshe.

Daahir Afqarshe — Mahadsanid; sidaa aad noo su’aashey waxa weeye hashu marka maalintii la abaahiyay marka aad ka tiriso todobo casho yaad oraneysaa waa gaasabax oo toddobo casho maalintaasay ahayd oo markaas cadadkii baad tirisay, juu, juu, juu, markaasaad hashii tiri markaa dabadeed maalintii ay tiddobo tahay waxaa loo yaqaanaa haddii ay riman tahay in xoogaa yar la yiraahdo waa daba qaad oo waa rimantahay waa taa dabada qaadday marka dabadeed laba dharaar oo dambe joogtana waa sida aynu u niri waa adkeysi, markaa waxaa la yiraahdaa, toddobadaa casho marka ay gaadho waa gaasa bixi ee haashaa ju’dii iney dabaqaaday oo rimid, rimayga waa aragtay ay u qabatay oo kale saa weeye oo waa toddobo casho.

Axmed Nuur — Kaas weynu garanay waxa kaleeto oo dabada socdaa oo

dabaqaadku daba yaalaa waxa weeye Guuto waxaan ku celinayaa marka ugu horreyso aan u dhiibayaa ninka la yiraahdo Salaad.

Salaad — Mahadsanid, Axmed Nuur; Gooje annagu waxaan niraahnaa hasha haddii inta ratiga abaahiyo, annagu horta laba cayn baynu u naqaanaa midi waxeynu niraahnaa daba culus oo ciyoba goojadeedo soo bixiso, halina marka ugu horreysaba waa qar muda meesha ay nimankaan ka leeyihiin, qarnugulka ay ka leeyihiin annagu waxaan niraahnaa hasha, hashaas waxaan niraahnaa annagu ma niraahno qar nugeylka, midna daba culus baan nirahnaa oo hasha aan ciyoowba goojadeeda soo bixin, daba culus baan niraahnaa oo labadaas dhegood yaa laga fiiriyaa midna hashaan oo qar nugeylka ahna, hasha qar nugeylkana waxaan niraahnaa tiib la bood, baan niraahnaa.

Marka ratiga uu abaahiyana toddobo ama siddeed beri markey joogtaba goojada waa caddeysaa oo siima celiso midda tan, middaasaan goojo niraahnaa oo aan goojadu u naqaan, goojadu markey caddeyso baan u naqaan oo niraahnaa.

Axmed Nuur — Horta anigu Salaad baan ayidayaa, tiib labod weynu dhahnaa annagu ereygaas tiib laboodka ah weynu dhahnaa, qar nugeylku ma aqoonin mindhaa ereyadaa iska badan, reer barigu waxey dhahaan tib la bood, neefkaasu waa tib la bood, xitaa mar bey haweenku isticmaalaan, Hebla tib la bood weeye mar haddii far la saaro uur bey yeelaneysaa waa nimanka goortay baxaaney rimaan, ayaa tib la bood la yiraahdaa, marka lagu taabtaba hor bey ka rimee marka waxaa la yiraahdaa... waxaan ku celinayaa weli Daahi Afqarshe oo gacanta taagaya oo cilmigaas anigaa fasiraya dhahaya waa kan.

Daahir Afqarshe — Mahadsanid. Sidaa aad u sheegtay weeye. Adeerkaaga awr la boodo leh, baa la yiraahdaayoo mar haddii awrku taabto maalintiiba waa goojineysaa, toddobada cashana ku simi meyso, awr la boodaan u naqaanaa ee waa kaa.

Axmed Nuur — Ereygii haddaba ahaa awr la boodo iyo tib la boodo, tibtuna waa ku dhicidii wixii ku dheceen, wax taf yar hadday ku dhacaan oo faxal ahi, hadduu ku dhaco ayeey tib leedahay haddii kale rimmeysaa wey rimeysaa iyo awr la bood labadaba waa taa.

Awrkaa qariyay koona wuxuuba sheegay labada eray waxba ma aha wey is fasiri karaan koow jilib laa bid jini ninkii keenaa bixiya ee waxaan u celinayaa Fiqi Buraale.

Fiqi Buraale — Waxa weeye oo aan anigu u aqaanaa geelii adigoo la jooga oo ay kugu jiraan halal badan geel badan oo aan rimaneyn yaan awrkuna uusan qooqaneyn yaad hashii iyo awrkii isku qasbeysaa, markaasaad hashii soo eryeysaa, awrkiina ju, juu, ju, intaad tiraahdo yaad u jilib laabayo waxa weeye ama diraacdii bey rintay hadduusan awrku markiiba isaga boodin isagoo xilli eegaya yaa la yiraahdaa, jilib laab taasaan anigu u aaqaanaa oo lagu khasbay awrka.

Axmed Nuur — Intaanaan u gudbin ninka la yiraahdo Dhega Weyne ayaa waxaa

Dhega Weynoow is diyaari, jilib laabkaas ereyga ah waa run oo horta taas waan u naqaanaa annagu jilib laab waa la dhahaa, mid kaleetona waa la dhahaa, garta bixi weyda oo lagu soo noqnoqda oo loo gogol dhigo oo bixi weydana jilib laab baa yiraahdaa, gartaa waa soo jilib laabatey baa la yiraahdaa, Dhega Weynow waa adi.

Dhegaweyne — Jilib laabkaa geel jiraha waa wada yaqaanaa awrkii ma qooqna hilina waa iska leeyahay, geel carman la yiraahdo oo wax waliba oo wax waliba carman bey – leeyihiin, carman gurgurtana geela waa ku jiraa, cagaha uma laabin awrkii hadduu beryo joogaba taa intuu daba galuu habeen gaaddada saaruu habeen kale abaahiyaa waa rimay awrkiina mar ma qooqin geeliina mar lama rimin, geel badan buu jilib-dhabaaleeyay,jilib-dhabaalna waa niraahnaa, jilib dhabaalihii baa geela halal dhowr ahi hebla iyo hebla jilib dhabaalihii bey ku rimeenoo awrkii ku rimiyay kaas jilib –dhabaalaa la yiraahdaa.
Gartana waxaan niraahnaa; gartu waa jilib carro oo waa xirantahayoo ninkii maalintaa laga gar helaa kuma noqon karo.

Axmed Nuur — Haa garta bixi weydaa waa la yiraahdaa. Eray aan kugu daray aad sheegtay baan xoogaa ka daba noqonayaa odayaashuna horayba u soo tuureen, carmal, geela carmal annagu ma dhahno waxaannu dhahnaa carwo oo waxaad moodaa magacii inuu magacii u eg yahay, laakiin weynu kala saarnay, carwo beynu dhahnaa, haa, carwo macnaha wax carwo leh weeye sow maad garan, waxaynu dhahnaa carwo ee carmal ma dhahno waa midda carwadeeyna laga keenay, carwadeyna tan waa wax geela ka soo baxay weeye ka soo bax waa ka soo baxay waaye oo midab ma leh.
Carwada Soomaaliyeed goorta la leeyahay waa wax laga soo xulay oo la soo saaray weeye, xul weeye micnaha, haa bandhig oo kaleeto wax la soo saaray weeye marka waxaan ku noqonayaa Fiqi Buraale intaan Salaad iyo odayaasha xagga ah aan aadin bal jilib laabka ku noqo Fiqi Buraalow.

Fiqi Buraale — Horta jilib laab sidaad u sheegteen buu u cad yahay waxa la yiraahdaa laba nin baa is qabsada marka garta la eegayo waxa la yiraahdaa gar keena gartaan maanta loo kala kici maayo waa loo jilib laabay, nin gabyaa ahna wuxuu yiri:
Garta jilib carro yaan qaadayaayoo jaajmandha laqayaa – buu yiri Jaajmandha laqayaa waa af Ingiriis ereygaa dambe, laakiin garta jilib carro mar haddii la yiraahdo waa gar aan loo kala kacaynin go'aankeeda halkaa lagu gaarayaa iyada oo la diidaayo in wax khatar ahi ka dhacaan waxaa waa wax la hor joogsanayo ee labada qof ee isqabsaday gartooda degdeg loo dhameenayaa, jilib carraa la yiraahdaa oo looma kala kaco.Jilib laabkana waa jiraa oo waxaa la yiraahdaa jilib dhig, jilib dhigna waa jiraa waa loo jilib dhigay reer hebel baa soo duulayoo waa loo jilib dhigay, haah, waa la yiraahdaa, jilib laabna waa kii geela, jilib dhigna waa difaacii, jilib laabkuna waa garta ruuxeedii, jilibadu saasay u badan yihiin.

Axmed Nuur — Cali Mudiir baa isna halkan ka dhaar dhaaranaya, bal caliyoow

maxaad adiguna jilib laab ka oran lahayd?

Cali Mudiir — Anigu su'aal leen celinayaaye een jilib laabka geela haddaan geela haddaan ku noqdo anigu waxaan u qaatay xilli aan caadi ahayn ee abaahin ku dhacda sow saas ma aha.

Axmed Nuur — Waxa weeye taasu waa u dhowdahay laakiin waxa weeye ratiga geela ku dhex jiraa aan dibadda looga keeninoo oo intaa geela ku dhex jira oo inuu qasbaday jilibka ulaabay weeye waa sidii gartii oo kaleeto weeye, laakiin xilligaasu waa u jilib laabay waxa halkaas ka soo dhaardhaarnaya nin la yiraahdo Daahi Afqarshe oo waxaan ka rajenayaa inuu jilib laabkaa gal ku dari doonana micneyndoona jilib laabkaa intuu u kala baxo.

Daahir Afqarshe — Mahadsanid. Anigu waxaan u aqaanaa marka awrku aan qooqin ee sidaa la sheegay hasha loo fadhiisiyo oo uu abaahiyo sidaa waan u aqaanaa, jilib awrna waan u aqaanaa waa marka awrku aanu qooqnayn, laakiin jilib laab waxaan u aqaanaa marka geelu uu wada maro baarqabka baa la yiraahdaa baarqabkii waa ka jilib dhigay oo khalaas weeye waa wada rimanyahay intii laga celinayay baarqabka ma ahee ee geela sanadkaa loo maleeyay dhalay maahee wixii kale oo dhan wuu ku jilib laabay kaasaan u aqaanaa.

Axmed Nuur — Anigu Daahir Afqarshe waan ku ayidayaa ereygaa jilib laabka ah, ratigii geelii waa ka jilib laabay wuu ka dafurayna waa tahay tii hore ku sii dar Fiqi-Buraale adi waaye.

Fiqi Buraale — Horta sidaas uu Aw Daahir yiri waan ku wada raacsannahayoo waa wax jira awrkii waa ka jilib laabay waa dafuuray waa markuu goonida ugu leexdaa waxaan kaloo u aqaanaa marka safar loo socdo oo la daalo bal halkan aynu ku jilib laabno aan ku nasanno taana waa la yiraahdaa, markaa jilib laabku waa fara badan yahay.

Axmed Nuur — **"**Hal kaa maqan ninkii mariyay waa magan Ilaahay" – buu ninkii gabyaaga ahaa yiri markaa kulli weynu soo wada xusuusaney saa, Salaad baan ku celinayaa, war bal Salaadow adiguna Jilib laabka maxaad ku dari lahayd.

Salaad — Mahadsanid Axmed Nuurow. Horta jilib-laab waa badan yahayoo waa sida uu Xaaji Ibraahim u sheegay ama Daahir u sheegay waa badan yahay jilib-laab haddii aan anigu in yar ka soo qaado jilib-laab annaga waxaan niraahnaa geela oo dhan markii awrku maho baan niraahnaa jilib-laab kalana waan niraahnaa ama laba caynba waan u naqaan, markaas ratiga aan qooqaneyn hasha uu abaahinayo amminla' waan niraahnaa, jilib-laabna waan niraahnaa oo ratigu waa loo jilib-laabay waan niraahnaa oo ratigaas loo jilib laabay maadaama uu qooqanayn oo uu geela la xilli ahayn amminla'na waa niraahnaa, labadaas caynba waa niraahnaa.

Jilib-laab kale waa badanyahay oo sida Xaaji Ibraahim uu sheegay mar waxaa la yiraahdaa haddii dadku socdo oo uu xoogaa daalo jilibka aan laabno waa la yiraahdaa jilib-laab kalena waa la

yiraahdaayo, waxa la yiraahdaa haddi ratigu abaaro waxa la yiraahdaa war ratiga aynu u jilib-laabno oo haamanka iyo waa dhigaayoo xoogaa waa loo kaadiyaa.
Jilib-laabku waa badanyahay, oo jilib.laabku horta saas buu u badan yahay, laakiin jilib-laab oo yacni annaga hashaas midka geela oo dhan u marana weynu niraahnaa, midkaan jilib-laab waan niraahnaa amminla'na waan niraahnaa laakiin jilib-laabka cadkiisa weyn waxaan u naqaan raatiga geela oo dhan maro yaan u naqaan.

Axmed Nuur — Ururkii ka bixi mayno hadalkii wuxuu ku soo koobmayaa jilib-laabkii halkaas aynu ku dhameyno, waxaan u gudbayaa Qubeys ama Kaadiraac, qubey iyo kaadi raacba, waxaan u dhiibayaa Dhega Weynow qubeys iyo kaadi raac.

Dhegaweyne — Qubeys iyo kaadi raac waxa weeye hashii waa rintay awrkii waa la heloo waa u qabatay, tobaneeyo markay joogtay ama mudadey ku goojin lahayd inay goojiso ay dhowr iyo toban amaba labaatan casho joogtay ay bilba gaarin yay kaadi-raacisoo quc dhicisay ama waa qubeysay baa la oranayaa ama waa kaadi raacisay waa isla mid, ee markaa awrkii baa jiranaayoo dib baa loogu haynayaa waxaa loo raacraacayaa war hebla goojadii hore waa kaadi raacisay ama waa qubeysay ee u haya awrka oo waa lagu celinayaa.

Axmed Nuur — Qubeys iyo kaadiraac waxay ila tahay nin ku daraya intaas ma jiro wax waa lagu dari karaa maxaa jiro waa erayo fudud oo aynu wada naqaano aan ka baxno. Afku xuuble, waxaan u gudbinayaa Fiqi Buraale.

Fiqi Buraale — Geelu waa afku-xuubleeyay geelii waa cadaad dheereeyay labadaaba waa la yiraahdaa, waxa weeye waqtigaasuna dhaacaa marka geelu qorax kulul ay hesho waqti kulul uu maro oo qorrax kulul ay ku dhacdo yaa la yiraahdaa isagoo aan xilligiisi gaarin yaa la yiraahdaa geelii waa cabaad dheereeyayoo geelii kurinka ahaa kullligii waa cabaad dheereeyay waa kow, waa afku xuubleeyay waa la yiraahdaa waa la yiraahdaa waxaa weeye ilmo aan xilligiisii gaarin geelu wuu soo tuuray ama cudur helay yuu ku soo tuuray saas baan anigu u aqaanaa.

Axmed Nuur — Afku-xuuble waxaan u gudbinayaa Salaad.

Salaad — Mahadsanid Axmed Nuurow. Horta sheygan annaga Afku-xuublaha la yiraahdo waxaan u naqaanaa hashu marka ay sagaal bilood joogto ama sideed bilood ay joogto ilmaha ay soo tuurto. Saddex waxyaalood baa annaga ka soo tuura ilmaha afku-xuublaha ah cudur dhukaan ah weeye cudurna dhugataa la yiraahdaa oo geelu waa qufacaa sida aad idinku badiba u taqaaniin marna waa qorrax saddexdaas xanuun yaa ka soo tuura, qoor-jabanana waan niraahnaa afku-xuublana waan niraahnaa saddexdaas cudur baana ka soo tuura oo aawadood ayey u soo tuurtaa hashu, marka waxaan niraahna waa qoor-jabaneysay waa afku xuuble labadaas waan niraahnaa annaga agtayna labadaas eray waa isku mid, afku-xuuble

iyo qoorjabane waa isku hal.

Axmed Nuur — Anigaa kugu ayiday saddexdii cudur aad sheegtayna waa kugu raacsahay kolba anigu aan eraygaa la yiraahdo afku-xuublaha iyo qoor-jabanaha weli annaga erayga qoor-jabanahaaba u xoog badan oo aad u xoog weyn afku-xuublahana waa la yiraahdaa.
Haddaad tiraahdid geelii waa afku-xuubleeyay waa garanayaa saddexdaa cudur aad sheegtayna gubatada iyo cudurkaan la yiraahdo dhukta iyo qorraxda badan oo aad siyaadada u ah iyo dhulka kulul oo uu joogo oo xun oo weli qaasan dhulka cagaaga leh cagaaga hadduu cagaago meel deex leh uu joogi jiray oo meel kulul la geeyo wey ugu dartaa waxaan u gudbayaa cabaad dheere geelii wuu cabaad-dheereeyay, cabaad-dheeruhu, erayga cabaadka ah wuu tiro badan yahay cabaad-dheere bal muxuu kaga duwan yahay Daahir Afqarshow?

Daahir Afqarshe — Cabaad-dheere labada hore ee lagu sheegayey buu la mid yahay.

Axmed Nuur — Wuu cabaad-dheereeyay geelii sidaasaynu kaga tagynaa wuu cabaad-dheereeyay halkaas aynu kagabaxno. Dhulku malable waxaan u gudbinayaa Dhega Weyne, Dhega weynow dhulku-malable.

Dhegaweyne — Dhulku malable waxa weeye neefjii laba bilood ama saddex bilood baa u dhiman kurus siyaado ah buu leeyahay baruurna waa leeyahay dhuuxiisuna waa macyahay xoolaha kalena waa ka hilib macyaha oo mid waa kaas waana kaliiloo oo geelaa waa lagu gaajaysan yahay markaa wuu dhalayaa waa geel gu’ii ka dhiciyay hawd fiican baa neefkii ama qaalintii rintay baad hal fiican ku sibkaysaa, hasha markaad ku sibkiso tiina waa ku ilkasooneysaa tiina caanay kordhisoo, caanay kordhisay dhulku malablihiina waad cuntoo geelii kal baad ku aroorisoo waa ugu noolaacoo waa ka macaan yahay kii hore.
Marka markaan waraabinayno qaalmada hoogada ah koox naasaha dambe dambarka ku taagan waa markaan habaareyno oo aan leenahay afkuxuublahaan xanuun kugu dilay aan ku xalan ee iska soo xoor sidaan ugu ducaysanaysaa, horta sidaa weeye dulku malabla hilib caanka iyo baruurta aah candhigihii shinka ku dhashay lahayn ee shikoodii buuxsamay ma leh nirgahaasu baaruurta ah shinu dhalab ma aha dhulku malabluhu waa ka macaanyahay geel hilibkiisa kale iyo nirgaha kale hilibkooda dee intaasaan dulkumalabluhu ka gaaray.

Axmed Nuur — Dulku-malabluhu sidaas ku macneysay si macaan weeye waxaan kugu sii ayidayaa kuugu sii darayaa anigu eraygaan la yiraahdo dulku-malabluhu iyo qoor-jabanuhu annagu horta geela hadaad ma aqaano mindhaa xooga geela lagu yar yahay baan jeclahay, geelu waa dhiciyay maba dhahnaba, waxaan dhahnaa geelu waa qoor-jabaneeyay oo qoor-jabanuhu muxuu ahaa macnuhu ma dheerayn baa ma afku-xuublaa oo sidaas baan u kal gurgurnaa oo dhicista baa ruuxeedii la sii kala gurguraa marka la cuni kalro oo uusan kici

karin oo aanu kici karin waxaynu dhahnaa qaar ku-malable baanu dhahnaa ee dulkumalabnahana weynu dhahnaa marka la cuni karo laakiin wax cunno ahba laga heli karin afku-xuubleynu dhahnaa. Oo dhiciskaasaa hadane noo sii kale darajo ah oo xoogaa derejo dii kala leh, marka la cuni karo oo aanu kicikarin ma kaco laakiin guud ahaan erayga qoor jabanaha waxaynu dhanaa dhiciska erayga la yiraahdo ma dhahno geela waa lagala xishoodaa.

Haweenkana dhicis waa lagala xishoodaa ee waxaa la yiraahdaa dilan ayaa la dhahaa, walow ilmaha markuu koro xoogaa uu soo baxo waxaa la yiraahdaa dhicisow iyo dhicis iyo dhicis iyo C/casiis dhicis iyo Ciise-dhicis ayaa la dhahaa, laakiin gabdhaha waa lagala xishoodaa ee way dhicisay lama yiraahdo.

Ri’baa dhicasa waxoogaa bay dhicisay baa la yiraahdaa ma aqaano anigu erayadaas sidii loo kala guri lahaa ayaan waxaan ku celinayaa odayada bal ereyadaas hala sii kala guro intaanaan Daahir Afqarshe iyo Fiqi Buraale aadin Cali Mudiir baa halkan ka dhaaranaya.

Cali Mudiir

Aniga ujeedadeyda keliyah waxaa weeye su’aal inuu sii caddaado ahaan waa la sheegay saddexdii hore sababta keenta dhiciska waa qorrax baa la yiri waa dhugto, waa dhukaan afku-malablaha maxaa sababay?

Axmed Nuur

Aan kuu sii qabtee anigaa ka jawaabaya taas ee waxaa sheegay Salaad baa sheegay afku-malabluhu horta qoor-jabane intaas buu ku jiraa waa kuleylkaas baa keenaya ama waxa keenaya saddexdaas cudur baa keenaya maka duwantahay laakiin waa darajada ugu danbeysa dhiciska laakiin wax yar baa kicidiisii ka dhiman, marka aan ku celiyo darajooyinka uu dhicisku kala leeyahay iyo geela erayga magaca loo isticmaalo ayaan odayaasha ku celinaayaa bal Fiqi Buraalow adigu maxaad oran lahayd.

Fiqi Buraale

Taa anaa horta kuu micnaynayee: Dhicisku marka la yiraahdo afku-xiible iyo marka la yiraahdo cabaad dheere iyo marka la yiraahdo duku. Malble iyo marka la yiraahdo qoorjabanle, guud ahaan horta waa isku wada hal laakiin waxbay ku kala duwan yihiin, ninka kan la yiraahdo geelu waa ilmaha kan waxaa weeye ee dulkumalable waxna waxaa weeye iyagoo nool bay dhashaan waxna iyaga oo aan noolayn bay dhaashaan ninka kan la yiraahdo dulkumalablaha waa nin la cunaaya neef la cunaayo weeye dhogorna maleh, kicina maayo xilligiisii kuma dhalayo kurus buuna leeyahay haa ma garaneysaa oo geel jiruhu wax uu ka jecel yahay ma jiro dulmalable iyo macal xarigiisa inta caloosha uun laga tuuro yaa la solaa markaas uun baa la cunnaa isaga iyo macal haragiisa oo harag aadagna ma leh dhogorna ma laha cudurkuse wax soo tuucay waa saddexdaa qodob waa dhugatada ama qorraxdaa kulul ama dhukaankaa helay, cudurkaas un baa soo wada tuuraa marka ugu horeyasa, afkuxuublaha, kanu ma noola badidiisu sidan qaalibka ah ma noola marka afkuxuublana waxaa loo yiri xabka geela ayaa afka kaga waxeysan markaasaa la yiri afkuxuuble, waa afku xuublaysay.

Qoorjabanuhuna isagu xilligiisi ma gaarin isaguna waa mayd lama cuno Laakiin afku-xuubluhu kistoo waa ka roon yahay oo waa ka

roon yahay afku-xuublaha, laakiin ninkaa dulku-malablaha ah yaa ugu wanaagsan xoolaha dhiciya xoolaha dhiciya ee geela xaggiisa ku saabsan.

Axmed Nuur — Dhiciska hal eray oo ka maqan ayaa jira saddexdaas oo darajada uu soo maray ninkii kaadi-raaca ah oo horay la inoogu macneeyay ayaa ku horreeyay isagu lamaba dareemaba, laakiin inta kale oo yaryar baan sii maraynaa, aan ka soo qaadno.
Waxa jira hanoneys, eraygaan hanooneys ah wax cusub buu iila eg yahay, hanooneys waxaan u gudbinayaa Jini ninkii keenaa bixiya la yiraahdaa Aw Daahir.

Daahir Afqarshe — Mahadsani. Hanooneys waxa la yiraahdaa xilliga ay dhali lahayd dee ayaamo yar ay ka soo horeyso markaasaa la yiri intaas oo halaad baa geelii hanooniyey oo ma irmaanaadeen haa mid walba hal baa lagu sibkay hanooneys baa la yiraahdaa haaheey, xilligii ay dhali lahayd baa ayaamo ayaamo yar horteed ayay dhaashay markaasaa ilmihii kici waayeen sababuhuna waa kuwii hore ee la sheegy bal waa ku kaa.

Axmed Nuur — Hashii waa soo qadishay anigu waxaan oran lahaa hononays, kaas anagu waxaynu dhanaa curil way curatay, curilna waa la dhahaa curaddii ma aha curil hononayskaas eraygaas waxaa raaca sida roobka oo kaluu ku shabakayaa horaadna waan dhahnaa way horaadisay, ma garateen, neefkaasaa horaadiyay, ma i garateen, marka Salaad baan ku celinayaa bal horaadiska kan iyo honooniskaas idinka idinka meeshaad honooniska dhahdeen annaga horaadis baan ka dhahnaa.

Salaad — Mahadsanid Axmed Nuurow. Horta afka Soomaaligu waa uu badan yahay, labadaan kalimadood haddii Daahir noo fasiray anigu honoonis horta ma aqoonin sida xaqiiqada ah laakiin haddii Daahir oo nin abwaan ah uu inoo fasiray horaadis iyo isagu waa isku hal innaguna horaadis baynu niraahnaa waa isla intaa.

Axmed Nuur — Horaadis buu noqonayaa aynu ka baxno aniga iyo Salaad horaadis baynu u naqaan aynu ka baxno. Waxaan kale oo rabaa erayga la yiraahdo geela maxaa loo oran waayay wuu dhiciyay wuu dhiciyay, maxaa loo oran waayay wuu buucleeyay, buuclaha maxaa buucle annaga waxaa jira wax la yiraahdo buucle oo buulaha idaha iyo ri’yaha ayaa loogu dhaqmaa dhiciska ruuxiisa waxaa loogu dhaqmaa riyaha ayaa loogu dhaqmaa bal waxa loogu diidayo geela buuclaha iyo dhiciska haddana dhiciska wax u waba dhicis ama hadday ilmuhu shan bilood ku dhalaan waa dhicis, guud ahaan waa dhicis, waxaynu ka garanaynaa in ay dhicis yihiin, xitaa dadku waa dhicis gabdhaha maxaa loo oran waayay way dhicisay ee loo yiraahdaa dilan, haaheey, dilan ilmaa ka dilmay ee shin u dhalad ma aha, wixii ku dhalay maxaa loo oran waayay bal intaa kala gura odayaal.

Fiqi Buraale — Anaa kuu kala caddeynaaya sidaan u aqaano, horta waxaa la yiraahdaa hadalka waxaa la yiraahdaa; "Hadal la kala oran og,

Eebbana la kala baryi og" – Hadalku midna waa qaawanyahay midna waa asturan-yahay, Asluubta xaggeeda waa loo dhowraa hadalkaas waxa loo oran waayay, bilmatel haweenka marka la yiraahdo waa dhicisay lama oran karo, annagu gaar ahaan weli waxeynu niraahnaa ilmaa ka soo duulay waa rimantahayna lama yiraahdo, xoolahana ilmaa ka soo duulay lama oran karo, haah, oo haweenka un baa la yiraahdaa ilmaa ka dilmay ilmaa ka soo duulay uur bay leedahay waa haweenkii way dhashay, ama way umushay haweenkaa la yiraahdaa.

Waa asluub ku dheehan hadalkeena, marka wixii waa isla dhicis marka la doono geelii iyo arigii iyo lo'dii iyo wixii gammaanayay waa kala duwan yihiin iyagu waa kala duwan yihiin, sidaa hadalka asluubtiisa loo dhawrayo yaa qiimaha af soomaaliga loo dhowrayaa oo geela aan loo oran karin erayada caynkaas ah inkastoo la yiraahdo waa dhicisay haa, la yiraahdo laakiin magacyada tan kore ee afku xuublaha iyo cabaad dheeraha iyo haddii Alla maayo dulku malablaha iyo caashaan wixii baa la sheegayaa ilmihii aan shinkiisa ku dhalan weliba haweenka markuu ilmuhu uu dhasho uu toddoba ku dhasho Toddobo ku dhalay baa la yiraahdaa laakiin weliba waxaa la yiraahdaa haddii uu – siddeed ku dhasho ma kaco yaynu niraahnaa laakiin haddii uu lix ku dhashana maba kaco yaynu niraahnaa, laakiin hadii uu toddobo ku dhasho ilmuhu waxaynu niraahnaa waa toddoba ku dhalayo waa carro madoow oo haddii Eebbe maayo waa dabakeen oo waa caynkanoo cashaan haddii uu kuu duceeyo labadaba markiiba waa la arkaa inshaaradiisa yaa la yiraahdaa waa afkuleeble saas baa la yiraahdaa laakiin waa lagala xishoodaa erayada qaarkood dhar ahaan iyo asluub ahaan baa loo leeyahay erayada tan, haaheey, waan ka baxay.

Axmed Nuur — Waxaa kaleeto oo jira oo aniga aad ii yaab galiyay oo markaad u fiirsato af Soomaaliga waxa weeye erayga kan la yiraahdo, waa kugu soo celinayaaye waxaa jirta wax la yiraahdo dhiciska erayga ah waxaa weeye waa guud ahaan macnuhu waa dhicin heerar buu maraayoo waa taynu geela ka sheegnay dhawr meelood ka sheegnay.

Riyaha ruuxooda waxa ay leeyihiin way dhiciyeen baa la leeyahay kaadi raacin baa la leeyahay oo kaadi yay raacisoo waa tii hadaayay qubays lagu sheegay, waxaa la yiraahdaa diigeeys baa la yiraahdaayoo way diigaysay waa la yiraahdaa waxaa la yiraahdaa wey qoor jabanaysay, qoor jabaneysi dadka qaarkoodu wey dhahaan buucalays baa jiroo buucalaysku waa la cunaa waa dulku-malable, waa dulku-malablaha ariga, waa buucle, buuclaa la yiraahdaa yey dhahaan oo nim baa la siiyaa oo waa la dubtaa oo waa laga liibaanaa dhogorna ma leh laakiin wuu dhow yahay wuu nool yahay isagoo is lifaaqaya baad arkaysaa oo waa la qawracaa.

Eray baa iiga yaabiyay oo kale idinkoo intaa buuclaha iyo waxyaabaha ii kala guri doonna odayaalow ayaan waxaan rabaa haweenka ilmuhu marka ka dhintaan oo ilmuhu ay ka dhintaan goortay saddex beri iyo afar beri joogaan raaca oo dhiig noqdaan ka dhintaan oo haweentaas caadiyaan haddaan la biqin oo hadda cilmigaan cusub aan loogu dhaqmin waxaa la oran jiray, heblaayo

qobsiinyo bay qabtaa iyo dilan bay qabtaayoo ilmuhuu way ka dhintaan iyo wey ka soo duulaan saddexdaas macnood ayaa la kala yiraahdaa. Riyaha iyo lo'da iyo xaywaanada kalana waxaa la yiraahdaa ufxanyo, oo hadalkaa labada eray baa lakala yiraahdaa, haddaad u sii kala fiiriso wuxu waa isku mid, Daahir Afqaarshow maxaad oran lahayd.

Daahir Afqarshe U faxanyaha anigu ma maqal, oo ma aqaanbaba laakiin kuwan kale haweenka marka la leeyahay qubsiinyo ilmaha lafihiisii ku jiro oo ilmo ma qabsato weeye haddii aan dhakhtar loo geyn oo ama dhakhtar miyi oo haweenkii waagii hore haweenka aka shaqayn jiray ah dhakhtar ma aynaan lahayne ama dhakhtarka imminka haatan maanta la helay aan haweenaydii laga soo saarin ilmaha lafihiisii yaa waxa la leeyahay qobsiinyay qabtaa, markaa ilmo dambe ma qabsato sidaa weeye.

Axmed Nuur Weli waa yaab iyo abyan aniga waxaan moodayay arintan inay xooluhuna ku dhacaan, riyaha waxaa jira ri'aan weligeed ilmo qabsan oo saas ku soo baxaan marka ridaasu qubsiinyay qabtaa, annaga lama dhaho, annagu waxaynu dhahnaa ridaasu ufxanyay qabtaa oo iydu dhaqid bay u baahan tahay oo ilmihii maydka lafahoodii baa ku jira way orgoonaysaa wey rimaysaa misna waxaasay dhalaysaa marka riyahaasu wey gurguurtaan aad bay u gurguurtaan, xoolaha geela ruuxiisa sas buu noqdaa. Marka odayaasha bal aan ku ceshee, ee wax ila garta waxaan aan sheegayo, maxay tahay eraygaa ee Fiqiburaale maxaad ka oran lahayd.

Fiqi Buraale Waxa weeye sidaa uu Aw Daahir u sheegay yaa xagga haweenka markaynu u kacno ay yihiin, waxaaba jira kuwo aan markiiba intay rimaan markiiba soo kaadi raaciya waxaa jira kuwo aan rimin misna orgooda ama arax taxaba kuwa aan rimin baa jira oo waxa la yiraahdaa hala gawraco oo qoorgooyn baa lagu sameeyaayoo cashaan haween baa u qaybsanaan jiray waagii hore, imminkana dhakhtarada yaa loo geeyaayoo dkakhtaradaasaa baara cudurkooda kan kale sidaa uu Aw Daahir u sheegay mar haddii lafahaasu ku jiraan dhiig baa soo gurta lafihiina waa ku harsan yihiin, marka ilaa laga soo xaaro sidaasay ku waxaysaneysaa.
Ufxanyaha waxaa weeye kii dadka yaa xoolaha loo yiri ufxanyo oo qobsiinyo lama oran karo, marka waa lagala xishoodaa marka macnuhu waa sidaas, wixiina weysku mid.

Axmed Nuur Wanaan ku celinayaa nin halkan oo labadaynaa isku soo dhawaanayoo aad mooddo xero joog inaynu isla nahay, ee Salaad, Salaadow maxaad, ufxanyaha adiguna inoo micnee.

Salaad Mahadsanid Axmed Nuuraw. Horta haweenka, annaga dilan waxaan u naqaannaa naagta uurkeeda la yiraaho lafaa ku jira oo mar walba iyadu lafaha ku haraan lafahaas waa la daaweeya oo naagaa daaweeyoo waxay yiraahdaan geedo kaarin ayeey siiyaan, marmar baa ilmuhu joogsadaanoo naagtii uurowdaayoo waxaa la yiraahdaa

waxay dhashaa ilmo meelo nabar ku leh madaxa ama calaamooyin leh yaydhashaan oo dilan baa la yiraahdaa, naagna iyadoo lix bilood, ama afar bilood ama toban bilood ah bay ilmuhu ka soo baxaanoo waxa la yiraahdaa waa ka soo duuleen yaa la yiraahdaa horta saas baa loo kala micneeyaa oo labadaas macno yaan ukla naqaan, naagna waa ka soo duuleen naagna dilan weligeed ah bey qabtaayoo Dhiigaasaa lafihii baa uurka ku jiraayoo shabdi ama soo baxaan, kuwana waxaa la yiraahdaa ilmihii dilmi jiray baa noolaadayoo waa iska noolaadaanoo iyagu marka dambe namiinaan arag oo nabro nabro leh oo la yiraahdo dilan bay ku dhasheenoo intaasoo saney dilmayeen shan saneey dilmayeen lix saney dilmayeen toddoba saney dilmayeen yaa la yiraahdaa, markaasay marka dambe yay dhashaan iyagoo nabro nabro lahoo meelo god god ah leh yay dhashaan oo taagni dilan baa la yiraahdaa.
Haddii hadal haddaayay aan gadaal ugu noqdo, geela iyo haweenka midna lama yiraahdo waa dhiciday ma isku raacsannahay horta labaadii oo markii Soomaali la yiraahdo ugu qaymo badnaa ma yihiin, labadaaba waa lagala xishoodaa oo wanaagga ay leeyihiin iyo xushmadda loo qabo weeye waxa looga xishoonaayay, dhicis kulligii waa dhicis wax kasta ha dhaleene waa dhicis laakiin iyagu xushmad gaar ah bay leeyihiinoo labada adduunyadu inta Soomaalida soo madhay waagii hore anigu faras sooma gaari, mar buu qiime lahaaye waagii hore faras iyo gabadha iyo geela yaa ugu qiimo weynaan jiraye hadda geelii iyo gabadhii baa sidaa qiimo u leh, sidaas yacni tixa tixo laga qabo iyo dhowrid la dhowrayo weeye maahine iyaguna waa dhiciyaan ee geelu waa dhiciyaa, laakiin macnaha waa lagala xishoonayaa waa xishoodkaas waxa u yeelaya Axmed Nuurow hadalkii intaasaan uga baxay.

Axmed Nuur — Weli waxaa iga maqan eraygaan la yiraahdo urfaxanyo, urfaxanyihii aniga iyo Fiqi Buraalaa isku raacnay marka urfaxanyuhu waxa weeye midka lagala xishoonayo wuxuu la mid yahay qubsiinyahaas ama dilankaa ilmaha iska dhimanaya, marka xoolaha lama oran karo qubsiimuu qabaa marka waxaa la yiraahdaa urfaxanyo, eraygaas ayaa la yiraahdaa labadaynu waa isku waafaqsanahay waa xishood lagala xishoonayo borobiyo waa quusinyaha sida quusinyaha, macnaa quusiinyow qabaa laakiin lama oran karo.
Waxa kaleeto oo halkan aynu ku gudbaynaa warkayna halkaas aynu ku joojinaynaa daba ka tuurkii ahaa ee erayada haray ama ka haray geela iyo markaynu ka hadlaynay waxyaabihii ka magaciisiinaayay in kasta oo weli wax badan oo badan laga hadli karo hadalka uusan dhammaan geela wax ka sheegiisa iyo cudurada ku dhaca iyo siduu yahay iyo sida uu u daaqo iyo waxa uu yahay waxaan inkasto oo aan la dhamayn karin ama cuuurada ku dhaca ama waxyaabaha geela sida loo xanaaneeyo, Soomaalidu siday geela u taqaano, haddaynu niraahno geelaynu ka hadlaynaa waxaan ogahay in bilal iyo sanadba ku dhameynaynin, haddaba halkaasaynu ku joojinaynaa, Daahir Afqarshe waad inoo joojinaysaa bay ila tahay Daahirna waa kanaa.

Daahir Afqarshe — Ee waxaynu ugu noqonaynaa dib baynu ugu noqonaynaa weli ma

dhamaan xoolihii wax ka sheegoodii oo waxaa jira inaynu hadda u gudbayno, odayaasha odayaalow xoolaha ama xayawaankaba ee dhalashadooda iyo facooda iyo heerarka ay soo maraan.

Axmed Nuur — Xoolihii wax ka sheegoodii iyo markay dhalaan siday noqdaan iyo markay dhalayaan iyo markay awr qaadanayaan ayaan ka doodnay odayaal, haddane waxaynu ka doodi doonaa bal xayawaanku markuu dhasho heerarka uu mari magacyada loo kala yaqaan, marka xayawaanku waxaynu waxaynu mudan ka siinaynaa shanta waryaal wax la yiraahdo, ama shanta meesi waxa la yiraahdo ayaynu horta siinaynaa, waxaynu ku xijinaynaa bafta yaynu ku xijin doonaa, markaasna ugaadha ayaynu ku xijin doonnaa.
Haddaba aan inoo hor mariyo kan ugu mudan oo muxuu yahay "waa nin maraadiisa masago uga buuxda" buu yiri ninkii sida qalfarka u sameeynayay, marka ariga bal aan ku hor maro. Ariga oo laba u kala baxaaya; riyo iyo ido u kala baxaaya, marka ariga bal aan ku hor maro. Ariga oo laba u kala baxaaya; riyo iyo ido u kala baxaaya, marka aan misna mudnaanta siiyo, waxaa la yiri dhimbilyi iyo riyo baa la yiri, marka riyaha aan mudanka siiyo, haddaba aniga oo maahmaahdaa hadalka ku dheeraynin waxa weeye riyaha ilmaha ay dhalaan magacyada loo yaqaan heerarka ay maraan, mar magaca loo yaqaan waxa uu yahay waxaan hor iyo horaad siinayaa Fiqi Buraale.

Fiqi Buraale — Waa tahay. Horta waxay ila tahay Axmed Nuurow sida tan aad soo jeedisay inay yihiin neefyaasha xoolaha xubin ka mid ah in aynu midba mar qaadano, waxaad ugu soo hareysiisaa adigoo neefyaashii soo maray riyaha. Anigu riyaha waxaan u aqaanaa marka riyo la yiraahdo magac guud baan u aqaanaa waa koow waxay u kala baxeen dheddig iyo labood guud ahaan tii kore haddaba ridii wey rintay maxaa rimiyay iyadoo uu rimay orgigii shan bilood bay siday, ilmo uurka kusidday way dhashay ridaa qura marka ma dhalin ee riyo fara badan baa dhalayn waxay noqdeen waxaro, markay waxaro noqdeen dheddig iyo labood bay kala noqdeen waxaa la yiri waxar iyo waxar waa koow guud ahaanna waxay ahaayeen waxaro, waa soo koreen markaasaa waxaa la yiri; saan u aqaano orgi iyo guud ahaanna waxaa la yiri markay intaasaan ay soo dhaafeen waxaa la yiri maxay yihiin nugeyd, ugeydkaasu ama waa riyo oo waa magacii guudka ahaa, laakiin ugeyd waa marka aynaan curanin oo orgiguna uusan riyahay orgeyn, waxartuna aysan curanin, banaankaana ay joogaan yaa la isku yiraah haa, ugayd saan aniga u aqaan, ugaydkii markaas muxuu kala noqday ceesaan oyo ceesaan markaasay weynaadeen ri’ iyo orgi bey noqdeen marka ri’ marka la yiraahdo waa doqob ama waa orgi qool ah oo waa orgi weyn laakiin waa la yiraahdaa markuu dhasho orgi baa ridaydii dhashay waxar bay dhashay ridaydii waa la yiraahdaa, laakiin marka aad dooneyso u abtirinta ama raad raaca yaa sidaa kale ee aan hadda sheegaayay anigu aan u aqaanaa ceesaan ugeyd ah iyo ri’ curad ah orgi qaylad, orgi qaylad ah markaan leeyahay waxa weeye

ceesaan niyaystay inuu riyaha ku qooqo uu hor geeyo orgi qaylad ah, waa tii la yiri, orgi weyn uu yiri intuu ciyay orgi yaa kaa qayladka waalayna waa la yiraahdaa waalay ceesaan waalay ah ama orgi waalay ah, geelana weli waa galaa waalaygaas markaas ridii ee riyay riyay noqotay ama duq ha noqoto ri' laba dhal ah, ri' saddex dhal ah, ri' shan dhal ah. Orgi weyn, orgi doqob ah. Orgi qool ah, ceesaan, waxar, waxarro, anigu sidaas aan iri yaan riyaha – magacyadooda intaan ka xasuusnahay aan ku joojinayaa.

Axmed Nuur

Horta aad baad u mahadsantahay afka Ilaahay kaama gooyaan ku leeyahay ee sidaad u kala saartay ri'du riyuhu siday magacyadooda orgiga iyo rida markay orgooto iyo ilmaha ay dhasho marka ugu harreyso waxa la dhaho iyo marka ugu horreyso waxaa ladhahaa canqar, wuu canqartay yaa marka ugu horreysa waa canqar baa magacaasu la yiraahdaa waxay la baxaan iyagoo waxarro la yiraahdo waxarruu la baxaa waxarrahaasu markaa waxay u kala baxaan dig waa marka caanaha xerada lagu hayaa ee aan la qaadi karin markay xoogaa dhaqdhaqaan oo ay ordaan waxay dhahaan baala markay unuutka sameeyaan ee ay wax gurgurtaaniin oo ay weli daaqin markay dhaafaan waxaas oo dhan waxaa la dhahaa aruq markay aruqa dhaafaan waxay galaan ogayd oo darajadii ogayd bay markaa galaan amiir baa markaa soo baxa dad baa amiir dhaha intayan ogayd iyo aroor inta u dhaxaysa markaa wax la yiraahdaa ogayd bay u kala baxaan.
Haddaba yaan hadalka qasin anigu warku iima furnee Fiqi Buraalow intaas adoo sii kala saarsaaraya ama wax iigu diidaaya ama iigu raacaya intaanan odayaasha kale u dhiibin adiga weeye.

Fiqi Buraale

Waa tahay Axmed Nuur. "Haddaan la rogrogin baa la yiri rag baan helin". Intaas oo dhan waan kugu raacsanahay, laakiin mid baan yare hee wax ku darayaa waxaa la yiri ridii wey dhashay ridii baa markay dhashay ama orgi dhashay ama waxar dhashay yare hee wuu socsocday war rida orgiga marka aad qarisay, waa koow marka waxarta, marka aad qarisay niigniigta ay nuugayso yaa la yiraahdaa ma aan qarin karto ee ridu orgi oo halkaa waxaa lagu tilmaamaa inay badha tahay oo caana yareys ay tahay oo waa inqartay oo hanqar wanaagsan markiiba markiiba waa korayaan rida baahisa marka laga marka laga anqariyo ilmaha ama waxar ha ahaadee nuugniinkiisaan u aqaanaa marka ay dhashaan waa ka anqariyay taas saasaan u aqaanaa ee marka la yiraahdo bid marka la yiraahdana waa marka aynaan dibadda u bixin guriga ay joogto oo ay socon karinoo oo marka la guuro awrta lagu qaado baal cadna waxaan u aqaanaa markay durduriyaan, haa, ee ay weli socod gaarin, laakiin wey ordaayaan aabaqna waxa weeye waxa la yiraahdaa carra cad iyo uur madoow yaa la kala yiraahdaa inta ay carab cad yihiin aabaaqa yihiin intay aabaqa gaarin mar haddey aabaqa gaaraanna waa uur madoow oo geedihii bay cuneen haa, oo waa abadeen weeye oo markaas sidii caanaha loo siin jiray loo siin maayo oo maxaa yeelay geedihii bay cunaan oo wey abadeen saas baan u aqaanaa anigu oo maxaa kale oo aad i weydiin lahayd.

| | |
|---|---|
| Axmed Nuur | Oo waxaa kaloo aan ku weydiin lahaa ogeyd iyo amiid. |
| Fiqi Buraale | Amiid anigu horta ma aqaano gacantaan ka taagay amiir, laakiin ogayd waxaan u aqaanaa markay gaaraan oo dhaafan ababkaa oo ay duleedyadaa ku cayaaraanoo ma garanaysaa boodboodaanoo dudimayaanoo, magaranaysaa ogaydka ogaydka ay weli dhameysan galadna aynan gaarin ee waxarihiina ay ak bexeen iyo intii aynu soo sheegnay oo ay riyuhii waaweynaa ay weli gaarin baan ogeyd u aqaanaa annigu. |
| Axmed Nuur | Waa mahadsantahay, horta eraygaan canqarka la yiraaho waa laba magac marka ay ilmuhu dhashaaniin waxa la yiraahdaa canqar yaa la yiraahdaa ma canqarisa mise waa laga dibay baa la yiraahdaa cagihiisu kuma kici karo wuu dhacdhacayaa, haa, waa caga laabyaa caga laab iyo caga dadab noocaas bay dhahaan wuu dhacdhacayaa mar hadduu istaago bes weeye ma istaagi karo waan ka baxay ninkii halkan baa jiroo Daahir Afqarsho la yiraahdo oo waxaraha iyo arigaba ay u xirnaan jireen oo buuro fuul ah oo baal, maya maya, sug sug ragga buurahaan aadayayaaye intaanan ragga magaciisa gaarin buuro fuulkaan aadayaaye waxaan aadayaa, Daahir Afqarshow maxaad oran lahayd ee aad u taqaano waxa la yiraahdo heerarka ay marto rida markay dhasho ilmaha ay dhashay heerarka ay maraan. |
| Daahir Afqarshe | Mahadsanid. Ridu marka ay dhasho intii laga sheegayay oo dhan waxaa dhameeyay Fiqi Buraale oo waxba ma harin canqarashada aan ku noqdo, canqarashada waa nuugmada ugu horreysa ee neefka rida lagu duwo yaa la yiraahdaa ma canqarisay mise weli ma canqarinin oo dhadhaladaa ugu horeysa ilmaha nuugmadaa oo kaliyah weeye ilmaha ma aha markaa dabadeed xoogaa ilmuhu haddii uu markii uu dhasho uu yara weeynyahay war yaa waaba mid canqarsan wax yar koriimo ahaa ku jirta macnihii uu nuugeeyaan dhadhamadaa caanaha ugu horreysa weeye horta canqarashadu koow dambarku waa caanaha isna ugu horreeya ee markaas rida naasaheeda ku jooga, waxaas soo dhaaf halkan caga balaarka aad ku sheegteen, neefka dhiciska ah ayaa caga balaar la yiraahdaa ee marka uu dhasho kolka xabka uu ka qalalo riyaha markiiba waa istaagaan markamhaddii uu dhacdhacayo shin baanu u dhalaninoo da’diisiibaa wax ka dhimanyihiin weeyaan macnuhu oo caga balaar baa la yiraahdaa oo waxaa loo qarinayaa bih oo sii wanaagsan isuma taagin koow markaa dabadeed sidaa aad soo sheegteen oo dhanna waan idinkuwaafaqsanahay neefkaasu dabadeed inta uu yaryahay ee rimay saqan yahay nuug baa la yiraahdaa marka uu ka gudo rida ee uu dibadda u baxo wuxuu noqonayaa ogayd, haa, labadaa macneey kala leeyihiin anigu intaasaan kaga baxay. |
| Axmed Nuur | Raggii adhiga yiqiin ma anigaaba soo gaaray adduunyaba weli ma soo marin raggii nugaaleed weli ma aanan gaarin. Anigu erayga kan canqarashada waan kugu waafaqsanahay, horta canqarashada waa nuugmada koowaad laakiin ilmahaasu ororodka gaarin oo uusan guul ku jeexa gaarin ka bixi maayo oo dhaylada ay yihiin magaca |

ugu horeeya magaca ee loo bixiyo waxa weeye canqar baa la yiraahdaa orgi canqarsan haddii laguu digo ninkaas wuu ku qariyay war canqarta ii daa buu ku leeyahay yacni wey canqaratay, yacni ma nuugin weli dhowr maalmood ma joogin waxay is leeyihiin amuu baruurta ku dhegaa faraha ayuu ku dhegaa, anigu middaas ayaan ka sii daba tuurayaa canqarashadu taa weeye waa isku waafaqsanahay, kanna waa mudaajo waa la dhahaa weliba odayaashu wey iigu dheggan yihiin bal canqarasgadii baa balaayo ka taagan tahaye, eray baan xasuustay iyadoo rag iiga aqoon badan oo Dhega Weyne iyo Salaad iyo Cali Mudiir iyo halkakan ay iiga soo jeedaan, eray baan xasuustay marka ilmuhu uu dhasho oo la yiraahdo midna wuxuu ku dhashaa shin oo sida loo miisaamo ilmaha dadku markuu dhashaba waa kala miisaan weyn yihiin oo waxaa la yiraahdaa waa kala miisaan weyn yihiinoo xooggooda ama dhalashdooda kal weyn yihiin taa waa isku waafaqsannahay, caashaan, magaraneysaa hanqarashadaa ee kan aad ku sii dartay markaas oo haweenka xaggiisa ah mid calaashaan markay waxaruhu daaqayaan duleedka oo ay aad u cayileen iyagoo caano nuugii weli ah yaa waxaa la yiraahdaa jeer jeer buu ii dhalay orgi jeer jeer ah yuu ii dhalay markaasaa la soocay inta feeraha laga bixiyo markaasaa subag lagu cunaa jeel jeel baa kaana la yiraahdaa, haaheey, jeeljeelkaas baan marka ku daray waxarihii.
Waxaa weeye geel jeerka intaanan aadin maya isagaa la yiraahdaa joqoluhuu ku soo daray waxaa la yiraahdaa orgi jeer jeer ah waxa weeye waa ku macal bixiya, macal markuu bixiyo weeye intuu nuugo nuugo laba toddobaad iyo saddex toddobaad intuu nuugay xoogaa adab ku dhowyahay garuur bixiyo misna uu macal yar baxsho ayaa jeerjeerkaasu noqonayaa wax ka macaan intaanan caanaha cabbin baruur caano ku kasaa la yiraahaa, odayaashu weli waa legdamayaan eraygii muran baa ka taagan ee waxaan u gudbinayaa Cabdi Dhega Weyne.

Dhegaweyne

Riyaha haddii wax layska weydiiya oo wax layga weydiiyo, horta marka ay dhashaan waxaa la yiraahdaa waa yar yihiin dhicis baa la yiraahdaa waxarna dhicistaa markay baxaana waxaa la yiraahdaa cadcad, haa marka hore waa dhicis marka xigana waa cad cadi marka xigana ee ay intaas dhaafaana waa baal-cadde, baal caddaha marka ay dhaafaan waa nugeyd oo ka gur baa la yiraahaa oo marka ay wax ka guraan nugeydkaas oo ama orgaha ha yeesheen ama ceesaamo ha yeesheen nugeyd baa kor laysaga yiraahdaa oo korka nugayd bay ka yihiin. Kan kale ee aad tiraahdeen naasa barka iyo canqarka aad sheegeysaana af soomaali sax ah baa ku jira, halkaasoow ah markaad anqarisay iyo markaad naasa bartay maqasha oo dhan waa ka simantahay cayn kasta ha noqdee markay dhalaan wax nirigtamaka naasa bartay war waysha saca maka naasa bartay rida wax maqashoo dhan ka dhexeeyo weeye oo waa saas, jeerjeerkuna sidii niriggaasu ugu badanyahay baa waa marka orgigu ka gudub joogo yaa origigii oo sidiis ah laguu qalaayaa marka markay tolaan ee feeraha ka bixiyaan xagna baruur ka leh xagna subaggaa lagu shiilay ama dabka la saaroo la soolay yay subagu siinayaan jeer jeer baa la

yiraahdaa oo waa kan ugu macaan, ninkey shixmadiyaane oo aad loogu shixmadiyaan yaa loo sameeyaa, aniguna intaas baan ka gaaray.

Axmed Nuur Waxa weeye horta eraygaan jeer jeerka la yiraahdo asalkiisu wuxuu ka yimid libaax-badeedkaa iska leh waxa weeye waa mujaas eraygana mar dambuu soo maxaa, eraygaas fog ma ah oo cimriga dheer leh ma aha waxa weeye waa mujaasoo ahaan waa loogu dhaqmay waxa weeye libaax noocii baaba jeer jeer la yiraahdaa oo yar yar oo midab iska ah oo noocaa isaga baa, waxa weeye libaax yaryarka kan ugu yar nooca ugu yar, ugu yar yar ayaa jeer jeer la yiraahdaa wuu cunno macaanyahay libaax badeedka ayaa la yiraahdaa jeer jeer wuxuu u kala baxaa tuur madoow iyo tuur cad buu u kala baxaa. Haddana eraygaan dadkii badmareenada ahaa magaciisii baa tegay baa tegay ayaa eraygaas siiyay oo wuu socday sow maadan garan wuu fiday haddane mujaaso ahaan xoolihii baa lagu dhaqmay orgiga kobcay caano loo dhigay si fiican loogu dhigay oo barwaaqo la joogo haddana abaday oo geedo cunay markuu koro haddii laguu qalo, jeer jeer baa la dhahaa isagoo halkaa jooga war orgigaa jeerjeerka ah I sii waad oran kartaa jeer jeer naftirkiis waa la oran karaa haddaba asalkiisii libaax baadeedkaasuu ka yimid, markii labaadna waxaa loo isticmaalay hilibkaa loo isticmaalay, markii saddexaadna waxaa loogu isticmaalay orgigoo nool baa qof waliba orgigaa jeer jeerka ah ii qabo yiraahdaa sidaa ayaa la oranayaa, waxaa gacanta weli taagaya Aw Daahi Afqarshe laakiin waxaan ka hor marinayaa Salaad, oo isaguna rag reer Mudug ah oo inaga badiya haye Salaadow.

Salaad Mahadsanid Axmed Nuurow. Horta ariga riyaha la yiraahdo waxay ila tahay idihii weli meesha kuma jiraan, ariga riyaha la yiraahdo marka ugu horeyda kalimaddaan hanqarshada la yiraahdo neefka caanaha ugu horeeya neefka, horta waan idinku waafaqsanahayoo waa caanaha ugu horreeya yaan hanqar niraahnaa. Ilmihii marka annaga labay u kala baxan orgi iyo wax bay u kala baxaan, origa laba cayn buu u sii kala baxaa mid marka uu yaryahay ee uu dhaasho yaa xaniinyaha laga siibaa waa la dhufaanay baa la yiraahdaa marna marka uu xoogaa weynaado oo yaa la tumaa oo la tumayaa la yiraahaa, horta laba orgiga baa u kala baxa.
Waxarihii horta maqashaan wax yar baan ku kala duwannahay maqasha annagu kulli oo haddey yar yar yihiin geel ha noqdeen, ari ha noqdeen, lo’ ha noqdeen kulli annagu kor waxaan ka niraahnaa maqal waa marka ay yaryaryihiin. Waxarihii marka ay yar yar yihiin meel Dhega Weynaan iska waafaqsanahayoo mindhicish baan niraahnaa marka ay yar yar yihiin yaan niraahnaa, xoogaa marka ay roonaadaana Axmed Nuur baan iska waafaqsannahayoo ununush baan niraahnaayoo geedaha ay cunayaan, ununush baan niraahnaa, marka ay ununushkaas ka baxaan oo ay ariga raacaan oo ariga lagu daro waa ogayd, ogeyd baan niraahnaa ogeydkaas intii aan weli orgoonin oo aynaan orgi gaarin ogeyd baan niraahnaa, ogeydkaas marka aan niraahno marka waxaa la yiraahdaa haddana mar curad waa midka marka kaliya dhasha, ri’da weynna rida weyn

baa la yiraahdaa orgigii marka labo ayuu u kala baxaa, orgigii baa haddane laba kale u sii kala baxaaya weyn eryo, orgiga weyn dibiguu la magac yahoo samal baa la yiraahaayoo kaas baa ariga ka dhacsadoo eryaayoo hadba ri' ka reebta.
Kanna waxaa la yiraahdaa, midkaan kalena waxaa la yiraahdaa ceesaan ba la yiraahdaa quu-quu-quu midka yiraahdo weeye oo aan ariga ogoleyn, midna waa ceesaan midna waa sumalkaas, oolabadaasaa misna orgiga u sii kala baxaya marka annagu horta riyaha intaasaan u naqaan.

Axmed Nuur — Waxa weeye waa isku waafaqsanahayo horta intaynaan gaarin sumalyadiisa iyo marka dhufaanka waxyaabaha aynaan gaarin bal horta heerarkee baynu maraynay dacwadeenu waxay aheed heerarka koow horta erayga uu muranku ka taagnaa waxa weeye erayga canqarashada isku mid baynu nahay neefka caanaha ugu horreeyay weeyaan laakiin marka orgi canqartay baacuqiisii caano ma ku jiraan, baacugiisa caanaa ku jira caano haddii la canqariyo waa la cunaayoo waxaad moodaa wax yaab leh oo wax ka macaan badan ma leh marka waxaa la yiraahdaa marka caanaha gorka ah ay ku jiraan ama ramaga ah ay ku jiraan ayuu sidii ku noqonayaa markuu noocaa isagoo ah la qalo uu halkaa uu taagan yahay orgigaana waa orgigii canqarka ahaa, yacni caanaha hooydiis buu nuugay wax kaleete ma qabo caanihiisa gorsi baa ku jira waxaa la yiraahdaa orgi marka marxaladda ugu horreysa waxar iyo riyaba marka caanahaa kaliya ee gorka ah ay calooshiisa ku jiraan canqarshaa la yiraahdaa.

Salaad — Midkaas horta Maxamed Nuur waan ku waafaqsanahay, Maxa'ed Nuurow waad mahadsantahay.
Hanqarkaas marka uu orgigu hanqarto oo la qalo calooshiisa caanihii galay baag baa la yiraahdaa bar yar baa la saar saaraa haddana dhuxul baa lagu bedelaa sida ukunta oo akle ayuu noqdaa oo loo cunnaa Maxamed Nuurow intaas aan anigu dhaafay adigu ku dar waadna mahadsantahay.

Axmed Nuur — Marka anigu waxaan ahaan jiray ari jire baan ahaan jirayoo waan arki jiray oo waan cuni jiray waxaas waxaan ka shaqeysto buu ahaa waxaas, waxaan ku wareejinayaa Cali Mudiir, Cali Mudiirow marka eraygaan hanqarashada horta caanaha la iskuma diidana laakiin mudaas ahaan baa loogu magacaabaye bal adigu.

Cali Mudiir — Een hanqan wax alle wixii dhasha waxa ugu horreeya e ay u cunaan waa la yiraahdaa hanqar anigu saas baan u aqaanaa oo keliya ariga yar marka ugu horeysa magaca kulmiya aniga waxaan u aqaan maqal, waxarro maya anaa qalday waad saxaysaa ujeedada waxa weeye saan u aqaano weeye ma ogtahay, laakiin anigu aan sheego bal saan u aqaano maqal iyo waxaro. Waxarihii iyo maqashii waxay u kala baxayaan orgi iyo waxar haddana ayay u kala baxaayaan waxaa kaloo haddana magaca kale ee ururiya haddane ubad ayaa la yiraahdaa marka intaas ay dhaafaan xoogaa waxaa la yiraahdaa indhamadoow geedo barad, caana nuug, wax yaalaha caynkaas ah

oo dhan baa la yiraahdaa waxaa kaloo la yiraahdaa markay xoogaa roonaadaan waxaa la yiraahdaa aaran saan u aqaano weeye, anigu marka ogeyd anigu waxaan uaqaannaa wax alla iyo waxaan curan oo dhan wax kasta ha ahaadaane ayaan ogeyd u aqaanaa in lay saxo oo lay qalad bixiyo waanu baahanahay een dhukaan, iyo tumay iyo baqay iyo waxaas goonni weeye iyagu qori qab iyo taas waa gooni kulli xayawaanka loogu tala galay oo dhan baa la yiraahdaa marka erayaada lagu raacsan yahay iyo ereyada layga saxaayaba diyaar baan u ahay.

Axmed Nuur Horta ereyga la yiraahdo amiir baan anigu haddaayay aan sheegay waxaan iri amiir iyo aaran labadaa erayba annagu waan ku dhaqannaa, sababta aan amiir iyo aaran ugu dhaqanay maxay tahay waxaa weeye markey ridu harto waxartii ilmuhu ka kacaan hooyadood oo gooni u daaqdo oo ariga meeshii ay rabto kaga darsanto waxaan oranayaa aaran iyo amiir baynu dhahnaa oo hooyadeed waa ka amiirtay yacni way ka tala baxday hooyadeed, intey hooyadeed la socoto waxa weeye waxarro oo ilmo weeye sow maadan garan marka ay tay hooyadeed la socoto waxaynu leenahay waxarro, hooyadeed ma ka hartay waxa weeye marka la leeyahay aaran ama amiir waxa weeye marka uu hooyadii ka haro hooyadiis waa ka harayaa waa ka gaboobayaa gooni ayay u daaqayaa markuu giinidiis u daago arigaas kale ayuu la mid noqonayaa marka intaa ka horreyso hooyadiisuu raacayaa, hooyadiis waa ka yaqaanaa ariga kale.
Gaana nuuga iyo caano ka har ama ka har baa la yiraahadaa maya isagoo geedaha cuna oo daaqa ayuu caanaha nuugi karaa waxaa la yiraahdaa ka har iyo caana nuug ka har hooyadiis waa ka haray, ama amiirkaa noqdoo caana nuug waan kuugu waafaqsanahay waxa kaleetoo aanu laga ma maarmaan ah mid haddaayay aan sheegay oo ahaa cubad marka la yiraahdo ereyga cubadka la yiraahdo ilmaha marka la yiraahdo magac guud oo waxaa qaba oo dhan ay wadaagaan waaye laakiin magac ahaan gaar ahaan ariga keliya ariga kaliya beynu ka hadlaynaa ariga waxaynu ku sheegnay bid oo weysku waafaqsanahay ee kan la yiraahdo canqarka caanaha gorka ahi calooshiisa ku jiraan waa canqar baynu ku tilmaanay hadda waan isla wada garannay baan moodayaa misna waa isku raacnay waa yaryarka marka ay yihiin oo caanihii caloosha oo aan wax ku jirin oo gofkii ka dhammaaday laakiin xoogaa uu dhaqdhaqaaqayo oo toddobaad meelahaas ay jiraaniin Baal cad waa marka ay ka baxeen (kururuk) oo ay soo wareegaaniin baal cad ama baal cas la yiraahdo waxaraha bista ah oo baal cadda ah oo biyihiina cabbin beeryaa wadee baharyaha ka reebay dhaheen waa ba’antahoo baqal yaha ka reeb.
Dadka kale xoolaha markay ka tagayaan waxay dhahaan amasay gaareen ama umuunisay gaareen ama abadey gaareen umuunas waa intaanu dabaqaadin markuu abaduu wuxuu noqonayaa carra cadow buu noqonayaa oo carra cad buu ka baxay waa marka uu jeer jeerka la baxo ninka loo qalo uu yaabka la dhimanayaa aaran buu la baxaayaa ogeyd buu gaaraa, ogayd buu u gudbayaa, markaas markuu amiir noqdo uu ogeyd noqdo oo hayadiis gooni

ayuu ka noqonayaa ma raacayo hooyadiis ama orgi ha ahaado wuxuu noqday oo wuu soo socday oo wuxuu noo yimid wax la yiraahdo ogeyd buu noo yimid. Ogaydkii wuxuu noqday ceesaan, ceesaan oo orgiga ah. Wuxuu noqday ceesaankaas horta wuu ka baxay markuu ceesaanka ka baxo wuu rimay wuu rimayaa waxaa loo tirin inta illaa uu ka dhalo oo dhashiisa la arko magacii ceesaanta waa uu wataa ceesaan ayaa noo curatay baa la yiraahdaa wuxuu ku rimaa, arigu labuu ku rimaa idahana waxay ku rimaana …ayay ku rimaan ariguu laba laba iyo bar riyuhu waa laba sug orgiga aan qaadanno idaha rima riyahaaba rima, idahaa dheereeya annaga marka waxaan u gudbinayaa Daahir Afqarshe.

Daahir Afqarshe — Riyaha iyo idaha annagu sidaan u naqaan idahaa horeeya sababtu waxa ay tahay guguu marka ay dhalato dayrtii oo ay baraar tahay ayaa jirta markaa lix bilood yay rimaysaa markaa dabadeed waa laga caliyaa oo waxaa la yiraahdaa baraansisi oo ninka dabadeed xoolaha si fiican u dhaqayaa waa ka joojiyaa, ninka kalena laba jirka intuu leeyo oo ku sumulataa dabadeed aad baa looga ilaaliyaa ragga in ay aad ugu dhaqmaan ee jooga dhulka qabow ee sanaag la yiraahdo ee Ceerigaabo lix bilood bay sabeenyu ku sumalataa dabadeed iyadoo baraara ah laba iyo tobankeedii bilood ay markaa joogaan bay dhashaa dabadeed riyahuna laba jir laba jir deeqa riyahaa jira baa la yuriyoo iyadana laba jir bay ku curataa marka waxaa horreeya idaha maya ee reer Mudug wey na dhaafsanyihiin waan ku noqonayaa waxaan u dhiibayaa Salaad ayaan u dhiibayaa oo dacwad ka qaba Salaad wuxuu leeyahay riyahaa hor rima ee bal Salaad adiga lee waaye.

Salaad — Mahadsanid Aw Daahir. Kolley annaga riyaha iyo idaha Mudug sida aan annagu u naqaan isuma dhowa riyaha hor rima, riyuhu sannad iyo bar bey ku rimaan iduhuna jeeruu laba jir dhameysto oo sidoodaba isku korniinaba ma aha, haa, riyaha hor rima.

Axmed Nuur — War bal dhega weynow kala gur labadaas nin.

Dhegaweyne — Waxa weeye riyaha horta laba jirka u daa in ay ku dhalaan oo ku curtaan oo curashada riyaha laba jir u daa, idaha cilmi bay ku bisideen, nimankaa reer woqooyiga ma ogolaadaan inay laba jir ka badan siiyaan laakiin haddii lagu sii daayo sabeentuna lix bilood bey ku rintaa sumalkuna lix bilood buu ku boodaa oo waxaa ka celiya ninkii lahaa uma ogola inay rimaan oo neefka dayrta u dhasha oo waa garac bay yiraahdaan neefka deyrtii kuu dhasha oo cidahaaga ka dhasha garac baa la yiraahdaa gebigiisaba mar haddii uusan gugii dhalan habeenka uurkaasu dhacdo yaa sumalka ugu horreeya, neefka deyrtiina waa sumal xaradoo waa neefkaa garacday meher kuma dhalan oo garac baa la yiraahdaa.

Axmed Nuur — Waxa weeye horta aad bey u sikatay Mudug, horta waanba kala baxnay wax dhaaxaaba aniga iyo Salaad is raacraacnaye hadda laakiin weynu kala leexanay, anigu waxaan raacay iduhu inay horrin ogyihiin baraansiis baa la yiraahdaa oo lix bilood bey ku rimaan

anigu reer bari baan ka hadlayaa oo buurahaa, biyuhuna laba kabo ka yar macabaan.
Horta bal aan idiin gar naqo, waxaa weeye horta intaa aad sheegteen oo dhan waa wada jiraan hasa ahaatee maxay ku kala duwan yihiin, waxa weeye degaanka hadba meesha ay xooluhu degan yihiin, maxaa mudug iyo sanaag dhaqaalaha xagoodu wey ku kala duwan yihiin, midna riyahay u roontahay midna idaheey u rootahay, maxaa yeelay idaha jooga sanaag lix bilood mar hadey joogaan iyo bari mar haddey lix joogaan waa laga xamlaa oo xamal baa lagu sameeyaa intaa halkaasla sameeyo absad iyo waxaas layska sameeyo yaa xamli looga sameeya markaasaa weliba waxaa la yiraahdaa kuwaas nisbiirta ah, nisbiir iyo tebid yaa la kal yiraahdaa idaha, waa koow Nisbiirtaasu waxay tahay inta sumal qaadka ah weeye, markaas nisbiirtaas la yiraahdo sumal qaadka si aynaan wax xun ugu dhalin sumalku yuusan osolin baa la yiraahdaa haddii Alla idmaayo ee saaraninoo markaas ayaa xamli loo sameeyaa, xamilkaasaa gaarka ka haya maxay laxuhu dhabarkiidaas ku beegmaan, idaha yaa xaamil loogu rogaa laxuhu soo raadsadaan yaa looga rogaa waa koow, waggaas halkaas ma looga rogsaday dhabarkooda yaa lagu beegi jiray maanta markay dhacaan otaabanka dhigaan laxuhu yaa looga rogaa maxaa yeelay xilligaa riixaaya, xilligii baa is guraaya, waa tabankii hore dhabarka markay fogaan baa laga furi jiray, haatanna laxuhu markay sii dhacaayaan yaa looga rogaa maxaa marka laga ilaaliyaa ineynaan sabeentu baransiis noqonin, neefka ay dhashaa baransiis noqonin yaa looga ilaashaa.
Mudug waa kuleyle salool bay leedahay ee meel riyo ku dhaqmaan weeye riyahay u wanaagsan tahay marka waxaa rimay horreeya riyaha marka sidaasey ku kala duwan yihiin.
Anigu waxaan moodayaa, “Waxaan moodi jiray wiil mara cadiba inuu mara gud yahay, waxaan moodi jiray gabar tima dabataba inay doonantahay!” Marka horta waxaan moodi jiray inayan ku xirnayn middaas, rimay iyo curashada neef ineynan ku xirneyn degaan laakiin hadda hal kaa maqan nin kuu mariyay waa magan Illaahay, odayaashii baa inoo fasireen oo inoo sheegeen, waxan anigu u qabay iduhu inay ka horreyaan, idaha inay ka rimid horreeyaan oo ka curad horreeyaan oo lixdaa bilood baransiiska ah loo bixiyay oo loo yiraahdo haddey lix bilood ku rimi karto waxa weeye wanku awood aan orgigu lahayn buu leeyahay awooddiisu waxay tahay sanadka oo dhan wuu qooqan yahay, sabeentuna awood aan riyuhu lahayn bay leedahay awooddeedu waxa ka ah bari bey leedahay waxay keydsataa subag badan bey kaydsataa ridu ma keydsan karto, bahalay candhada sida baaliduba ama beyd ha loo baaciyee bawdada ku qabo, waa tii gabadhii heesaysay tiri oo ridu weligeed bey taagantahoo waa daba riyaadoo, cajaba mudiid daba riyaad baa feednaayoo waa tii la yiri waxba ma haysato, marka iyadu ma ay qaadi karto, oo waxaan u qabay anigu inayan laba sano ka yar ay ku rimi karin waayo dhulka buuraha rida wey u daran yihiin idaha wey ka caleen badan tahay wey ka dahsoontahay buuraha ayaa dahsoosan geedo aan laga helin dhulka banaanka ah ayaa buuraha laga helaa, laba jir ka yar kuma rimi karto rida ayaan qabnaa.

Buuraha caynkaas ah laxdu lix bilood ayey ku rintaa Cali Mudiir baan isaguna ku wareejinayaa bal banaankaas iyo dooxooyinkaas ee Mudug oo bartanka deggan.

Cali Mudiir War anigu Mudug ma tegin mana aqaane meeshatan waxaad moodaa wuxu in ay ku xiran yihiin horta deeqaanka iyo dhaqanka xoolaha sida loo dhaqdo iyo wuxu siday u koraan oo u kobcaan, haa, sida loo dhaqaaleeyo iney ku xirantahay baad mooddaa waxaad moodaa hadalka uu sheegay Fiqi Buraale inuu isku keenay aaraadii oo mid walba say u jirto, matalan hadda aan ka soo qaado ari carbeedka lix bilood bey ku rintaa oo xayawan kale kuma rimo, waayo waxa weeye markay saddex bilood joogto ceesaan weyn weeye, marka ari carbeedka kan waayo cuntada ay nuugto iyo sida ay u korto weeye haah, waxa weeye marka la yiraahdo sameentii iyo waxartii yaa rimi og yaa baaluqi og haddii la yiraahdo macnuhu waxay ku xirantahay horta degaanka dhulku ma qabowbaa, mise waa kulayl, cuntada la siiyay iyo caanaha cunuggu soo nuugay muxuu yahay, dadka dhaqdaa sida hanka ay ugu kala ogolaadeen rimayga iyo rimay La’aanta sidaas inay ku kala xirantahay baan u maleynayaa, waad mahadsantiin.

Axmed Nuur Waa run oo degaanka horta door weyn buu ku qaadanayaa horta idaha leyskuma hayo inay lix bilood ku rimaan, wanku wuxuu leeyahay awood gaar ah oo aan adigu lahayn, iskuma hayno isaga laakiin rida weeye waxa aynu isku haynaa, wanku waxa weeye awoodda uu leeyahay, ridu ma laha, iduhu wey ka kori ogyihiin.
Horta Mudug waa dooxad, dhulka diixa yar ah iyo banaanka iduhu wey ku kori og yihiin, rida weligeeba waxey u xeerataa dhulka buuraha ah iyo saloosha iyo geedka sare leh, ayeey xeerataa, iduhu geed hoosaadkay raacaan marka mudugna waa naga barwaaqo badan tahay ma ila garatay.

Salaad Mahadsanid. Maxamed Nuurow. Horta anigu hadalka uu yiri ninka la yiraahdo Fiqi Buraale horta hadalkaasaan la dhacsanahay horta waxa weeye, meesha Mudug la yiraahdo, Ri’dan iyo meesha Sanaag al yiraahdo, saddexdoodu waa kala duwan yihiin, Sanaag idaha caanaha laha maalaa waa la lulaa, Mudug caano ido lagama maalo. Mudug sidiisa ido caano lagama maalo. Daawo in laga rabo oo la qasho oo la bixiy maahane. Waa runtiis horta caano lagama maalo riyaha wax la caano ah riyaha wax la caano ah, geelaan la caano ahayn, Mudug geel baan la caano ahayn, lo’baan la caano ahayn, wax la caano ahi ma jiraan, toban riyo ah reerka ay u dhashaan Mudug waa faqri baxay, waa bes, hal ri oo waxaa jirta nin uusan caanaheed dhameyn karin, marka wuxu degaankay ku xiran yihiin, marka sidii aan anigu marka ka kasay oo anigu ay ii dhacday sidii xaajigu u sheegay waa sidaas.

Fiqi Buraale Maya ee eray baan ku darayaa oo waan isku qancinayaa.
Maanta Xamar beynu joognaa riyo iyo idaba wey joogaan si bey u wada rimaan labaduba maxaa yeelay, wananka rabaayadda ah iyo sameenada rabaayadaa ah ee guryaha ku xiran, riyaha rabaayadda

ah ee iyagu iska cuna hununskooda iyo shaahooda iyo hilibkooda oo dadka oo kale ah labaduba lix bilood markey joogaan labaduba waa rimaan, maxaa yeelay, degaan bey wada joogaan oo si bey wax u cunaan, garaan marka marka xooluhu sey u kal duraan maynaan arkin dharigooda quraanka.
Marka aad eegtaan anigu gabar aan dhalay sagaal sannadood markii ay jirtay caadadii bey lahayd, haddii loo guuriyo soddon kuma xuma, wey joogtaa hadda, marka waa sidaa korriinkoodu iyo cuntadoodu iyo degaankoodu uu yahay, yay kala yihiin wax waliba.

Axmed Nuur — Hadda gabadhii wey adkaatay, caawana hadalkii halkaas yeynu ku soo xiranaynaa saacaddiina way noo dhamaatay, halkaas maanta waxarraha aynu ku joojino.

Daahir Afqarshe — Shirkii waa la xiray maanta halkaa ha inoo joogo sidaa iyo nabad gelyo weeye iyo maalintii aynu kulmi jirnay, haddii uu Eebbe ina kulmiyo.